

Ma doonayaa inuu ku raaco qof mudawac ah (frivillig bisidder), marka aad la kulmaysid ma'suuliyiinta dowladda?

La xiriir wehel-yeelayaasha hay'adda DRC si aad u heshid wehel-yeele mutadawac ah marka aad la kulmaysid tusaale ahaan dowladda hoose (kommune), laanta socdaallka (Udlændingestyrelsen) ama xarunta arrimaha qoyska (familieretshuset)

Wehel-yeele mutadawac ah oo kuu raaca kulamada aad la yeelanaysid mas'uuliyiin kala ee dowladda wuxuu kaa caawin karaa:

- sidii aad si degan arimahaaga aad uga hadli lahayd
- inuu kula dhegaysto waxa laga hadlayo
- wuxuu isagoo adiga kuu hadlaya mas'uuliyiinta waydiin karaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan kiiskaaga.
- wuxuu kaa caawinayaa inaad fahamtid saamaynta uu waraysiga ama go'aanka lagaa gaari kugu yeelanayo ama waxa uu kaaga dhigan yahay.

Weheliyuhu maahan turjumaan, looyar ama qof cid matala sidaas darteed inuu kulanka kaala qayb qaataa waa caawinaad keliya.

Sidee ku heli kartaa wehel-yeele?

Noogu soo dir qoraal cinwaankeena **bisidder@drc.ngo** ama naga soo wac **+4560268002**. waxaad sidoo kale soo buuxin kartan foomkan **drc.ngo/frivillig/bisidder**. Inaad heshid qof wehel-yeele ah ah waa lacag la'aan (bilaash)!

Wehel-yeelaha mutadawaca ahi waxaa waajib ku ah inuu qariyo sirta lagu aamino. Dhammaan wixii aad u sheegtid wehel-yeelaha waxay ahaan sir sida sharcigu dhigayo sharciga sir qarintu.

Sidee kuu caawin karaa wehel-yeele mutadawac ahi (frivillig bisidder)?



Na soo wac ama qoraal noo soo dir haddii aad doonaysid qof mutadawac ah oo kuu raaca kulama waraysiga ah. Waxay noqon kartaa kulamada lagaa waco kommuunka, laanta socdaalka (udlændingestyrelsen) ama xarunta qaabilsan arimaha qoyska (familieretshuset).



Waxaan kuu raadinaynaa wehel-yeele mudatawac ah oo doonaya inuu ku caawiyo. Qofka wehel-yeelaha (bisidder) ah ayaa kula soo xiriiraya 1-3 maalin ka dib marka aad nala soo xiriirto. Adiga iyo wehel-yeelaha ayaa ku balamaya waqtiga iyo halkii aad ku kulmi lahaydeen, si aad ugu diyaar garowdaan balanta waraysiga ee ay dowladdu kuugu yeertay.



Marka aad la kulantid wehel-yeelahaaga wuxuu kula eegayaa waraaqada iyo dukumentiyada kiiskaaga ku saabsan. Wehel-yeeluhu wuxuu kaa caawinayaa inaad u diyaar garowdo waraysiga iyo inay kuu dhan yihiin waraaqaha iyo foomamka la xiriira kiiskaaga.



Marka lagu waysanayo wehel-yeeluhu wuu kula fadhiiyaa keliya laakiin adiga ayaa lagaa rabaa inaad ka warantid kiiskaaga iyo inaad ka jawaabtid su'aalaha lagu waydiiyo. Wehel-yeeluhu waraysiga ayuu dhegaysan wuxuuna qoranayaa waxyaalaha muhiimka ah wuxuuna kaa caawin doonaa inaad waydiisid qofka ku waraysanaya wixii su'aal ee aad adigu qabtid. Marka kulanku dhamaado, kala hadal wehel-yeelaha siduu u arko qaabka waraysigu u dhacay iyo waxa laga filan karo.

Nagala soo xiriir! Qoraal noogu soo dir bisidder@drc.ngo ama naga soo wac +4560268002